



Dalka Maraykanku wuxuu leeyahay dastuur dhowra xuquuqada aadamiga ee dadka ku nol Maraykanka oo dhan. Hase yeeshe xuquuqdaas waa in loo dadaalo sii loo ilaashan lahaa, loona xaqiijiyo in dadka oo dhan si siman loo dhaqo.



## Anigu ka socoto ahaan maxaa xuquuq ah oo aan leeyahay?

Xuquuqda soo socota ayaa dhowrta dadka oo dhan, ayadoon loo eegin socoto iyo mid aan sharci lahayn, mid rasmi ku jooga iyo muwaadin tona.

- **Xaqa aad u leedahay inaad u doodu is bedel- Qodobka kowaad ee dastuurka Maraykanka ayaa dhowraya xaq u leeyahay qof ama kooxda u dooda bedelaadda sharci, dhaqanka dawladda iyo xataa nooca dawladda.**
- **Xaqa aad u leedahay inaad aamusnaato -** Qodobka shanaad ee dastuurka ayaa siinaya qof kasta inuu aamusnaan karo marka ay Bolisku ama qof dawladda ka socdaa su'aalo weydiinayaan.
- **Xaqa in laga madax bannaan yahay Baaritaan iyo qabsasho aan Macquul ahayn -** Qodobka afaraad ee dib loo eegay ayaa ka xaarantinimeeyay dadka u shaqeeya daawladdu inay baaran guriyaha ama

xafiisyada ayaga oon fasax ka haysan xaakin.

## Maxaan sameeyaa haddii dad dawladda ka socoda su'aalo i weydiyaan?

Wax kasta oo aad u sheegto boliska, FBI, ama INS ayaa lagu isticmaali karaa in lagugu eedeeyo. Bolis, FBI ama INS ama hay'ad kale oo dawli ah baaritan dembi wadaa midna xaq kuugu ma laha magacaaga iyo ciwaanka aad ku nooshahay wixii ka baxsan inaad kala hadasho, adigoo jidka socoda ama guri joga ama xafiiskaagaba amaba xabsi ku jira toona.

## Maxa dhacaya haddii aan boliska iskala hadalo?

Wax kasta oo aad u sheegto boliska waxa lagu isticmaali karaa in dembi lagaaga dhigo. Waxaad xasuusnaataa in been loo sheego dawladdu tahay dembi.

## Maxaan yeelaa haddii sarkaalku fasax baaritaan uu xaakin ka sito?

In kasta oo uu fasax haysto baaritaan sarkaalku, xaq kuugu ma laha inaad su'aalihiisa ka jawaabto. Waxa xaq sharci ahan kuugu leh jawaab waa xaakimka oo kaliya.

Haddii aad ka cabdsato inaad diido, waxaad u sheegtaa in arkaan looyarkaaga. If you are nervous about simply refusing to talk, tell them to contact your lawyer. Haddii aadan lahayn looyar waxaad la xiriiri kartaa ururka SIREN oo soctada ka caawiya arrimaha degdega a, telefoonka Santa Clara County Lawyer Referral oo ku caawin doona.

## Maxaan yeelaa haddii jidka lagu jojiyo?

Weydii boliska sababta lagu joojiyay, weydi "Miyaan xidhnahay" mise waan iska socon karaa?



**Ma rabta war dheeri ah?** Ka la xiriir xafiiska SIREN's ee ka caawiya socotada xagga macluumaadka , weydii wixii war cusub ama barnaamijyada jira, khadkoodu telefon wuxu furan yahay Is-Ji 10am - 4pm, luqado kala duwanna way ku hadlaan. Sida: Spanish- (408) 286-1698 Vietnamese- (408) 286-1448 Farsi- (408) 286-5680 x108 Chinese- (408) 286-5680 x109

Haddii aysan ku odhan waad xidhan tahay, u sheeg in aanad diyaar u ahayn si wadista hadalak, o aad hawshaada qabsanayso. Markaasna sidaas yel.

## Maxaan yeela haddii bolisku ay i joojiyaan baabuurka anigoo ku jira?

Waa inaad tusto boliska sharciga wadista, fasaxa baabuurka iyo caddeynta caymiska. Ha ogolaan in lagu baaro. Hase yeeshe mararka qaarkood waa la baari karaa baabuurkaaga haddii bolisku ay haystaan wax maqul ka dhigi kara sababta ay u baarayaan.

## Marka lay xiro su'aalaha inaan ka jawaabo miyaa?

Maya. Haddii lagu xiro ma aha inaad bixiso hadal qoraal ah ama su'aalo ka jawaabto. Haddii lagu xiro oo aanad rabin inaad jawaabto, isla markaasba weydiiso in looyar lagu hesho. Xaq waxaad u leedahay in aanad ka jawaabin su'aalo inta aad looyar ka helayso.

## Maxaan yeelaa haddii dad dawladda ka socdaa rabaan gurigeyga in baaraan?

Ma aha inaad u ogolaato boliska ama dad sharciga ka socdaa inay soo galaan guri ama xafiiskaaga, haddii aysan wadan fasax xaakim. Haddii ay haystaan fasax xaakim uma diidi kartid.

- **Waa inaad aragto fasaxa xaakimka.** Fasaxu waa inuu qeexayo meesha la baarayo iyo shayga la raadina. Haddii ay fasaxa haystaan uma diidi kartid kamana celin kartid inay baaraan.
- **Waa inaad u sheegto in aanad raali ka ahayn barista.** Arrinttasi waxay ku khasbi

kartaa inay ku ekaadaan goobta baaritaanka oo kaliya.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso inta ay barista wadan, qortana magacyadooda iyo lambarkooda iyo hay'adda ay ka tirsan yihiin.** Saaxibadaada kula jooga ka dhigo marag, warkana u gudbi looyarkaaga. Fasaxu xaq uma siinayo ina su'aalo ku weydiyaan.

## Maxaan yeelaa haddii lay handado ama isir nacayb lay gar daraysto?

Sharicga ayaa ka dhowra dadka falaka iyo dembiya isir nacaybka. Isla markaasba qaad talaabo aad ku war gelinayso arrinta ama demnbiga:

The Immigrant Q & A Information Line:

(408) 286-1698 (Spanish/English),

(408) 286-1448 (Vietnamese/English),

(408) 286-5680 x108 (Farsi/English) and

(408) 286-5680 x109 (Chinese/English).

Iyo waliba, the Anti-Hate Hotline: 408-279-0111 or Hate Free Communities, Delorme McKee-Stovall: (408) 792-2304. (See pg. 97 on Hate Crimes)

## Maxaan yeela haddii aanan mawaadin ahayn?

- **Ma aha inaad tustid boliska ama INS sharciga aad ku jogto dalka iyo meesha aad ka timid toona. Iska aamus.**
- **Haddii aad tahay ajnebi oo lagugu xiro Maraykanka, waxaad xaq u leedahay inaad wacatid qunsulka dalkaaga ama bolisku war geliyaan. Qunsulkaagu waa in uu kaa caawiya sidii aad looyar u heli lahayd. Bolisku waa in uu u ogolaada qunsulkaagu inuu ku arko waraysina kula yeesho si uu u war geliyo goyskaaga. Waxaad xaq u leedahay xataa inaad diido in loo sheego qunsulkaaga. Ha la hadlin INSta telefonna ha ahaatee ilaa inta aad la kulmayso Looyar arrimaha**



**Ma rabta war dheeri ah?** Ka la xiriir xafiiska SIREN's ee ka caawiya socotada xagga macluumaadka , weydii wixii war cusub ama barnaamijyada jira, khadkoodu telefon wuxu furan yahay Is-Ji 10am - 4pm, luqado kala duwanna way ku hadlaan. Sida: Spanish- (408) 286-1698 Vietnamese- (408) 286-1448 Farsi- (408) 286-5680 x108 Chinese- (408) 286-5680 x109

socodaalka ah. Waxaa heli kartaa looyar haddii aad wacdo khubarada la yidhaado **National Lawyers Guild** (number below) ama wacdo **Immigrant Q & A** khadka wararka,.

## Kala soocu waa maxay?

Kala sooca waa marka bolisku, FBI ama hay'adaha kale ee sharciga fuliyaa ay kuu baaraan ama wax ku su'aalaan taasoo ku salaysan midab, isir ama diin. Haddii aad rumaysan tahay inaad sababhaas mid ka mid ah u xayiran tahay wac telefonka **ACLU** lacag la'aan 1(877) 6-PROFILE ka codso xaanshida cabashada lagu qorto.

## Baro xaqaaga kuna dhaqan!

Dadka aan mawaadininta ahayn waxa leeyihiin xuquuqdan:

- Xaq ayay u leeyihiin inay looyar qabsadaan inta aysan ka jawaabin wax su'aalo ns ama saxiixin wax hadal qoraal ah.
- Xaq waxay u leeyihiin in xaakim socotada sharcigeeda ahi dacwadooda dhegaysto.
- Xaq waxay u leeyihiin inay helaan looyar socotada ah marka INSTu wareysanayso ama xaakim loo gudbiyo dacwadooda. (Hase yeeshe xaq u ma lihid looyar la'ann ah oo dawladdu kaa bixiso)
- Xaq waxay u leeyihiin inay dalbaan in laga sii daayo xiiraadda, ayagoo bixinaya lacag curaar ah.

Waa inaad ku dhaqanto xaquuqdan. Haddii aadan codsan xuquudan, waa lagu masaafurin karaa adigoo looyar iyo xaaakim midna lagu horgeyn. Haddii aad qaabkaas ugu baxdo dalka Markaykana, dhib weyn ayaa kaa soo gaari karta haddii aad damacdo in aad ku so noqoto, ama aad sharci degenaansho u heshid. Fadlan la xiriir lamabradan si aad u ogaato isbedellada cusub ee sharci ee khusaaya xaquuqda aadanaha.



## AIDS Legal Services

111 E. Saint John Street, Ste. 315 San Jose 95113  
Tel: (408)293-3135

Luqadaha: Spanis, English, Khadka luqadaha AT&T

Adeegyada: Adeeg toos ah oo la siiyo dadka qaba cudurka HIV iyo AIDS.

Mushruuca Fair Housing Law Project: Guryo Rakhiis ah.

Mushruuca LACY: Waxay u doodaay oo ka kaalmeeyaan xagga sharciga carruurta iyo dhalinyarada, tacliin xagga sharciga iyo xeerka ah, xoryenta, ilaalinta, dadka ayaan guryaha haysan iyo dhalinyarta fakadka ah, qabdha yaryar ee uurka leh iyo kuwa iyagoo yar waalidka ah. Sharciiga oo si lacag la'aan ah looga kaalmeeyo kuwa kar 14 sano.

Mental Health Advocacy Project: Waxay u doodaan in la helo adeeyo daaweynta m,askaxda ah.

## **American Civil Liberties Union (ACLU)**

Tel: (212) 549-2500

## **American-Arab Discrimination Committee (ADC)**

Tel: (202) 244-2990

## **Asian American Legal Defense and Education Fund**

(212) 966-5932

## **National Lawyers Guild**

(212) 505-9119

## **U.S. Commission on Civil Rights**

Tel: (800) 552-6843



## Service Immigrant Rights & Education Network

778 N. First St., #202, San Jose, 95112

Tel: (408)286-5680

### Immigrant Assistance & Information Lines:

Spanish: (408)286-1698

Vietnamese: (408)286-5680 x 1448

Farsi: (408)286-5680 x 108

Chinese: (408)286-5680 x 109

Website: [www.siren-bayarea.org](http://www.siren-bayarea.org)

Adeegyada: War siin iyo tilmaan ku saabsan gargaarka bulsh, wacyi gelinta bulshada xagga deeqda guud (Public benefit) u doodistain xeerka loo fududeeyo. Tababar iyo gargaar aqooneed xagga socdaalka iyo arrimaha la xiriira.



**Ma rabta war dheeri ah?** Ka la xiriir xafiiska SIREN's ee ka caawiya socotada xagga macluumaadka , weydii wixii war cusub ama barnaamijyada jira, khadkoodu telefon wuxu furan yahay Is-Ji 10am - 4pm, luqado kala duwanna way ku hadlaan. Sida:  
Spanish- (408) 286-1698 Vietnamese- (408) 286-1448 Farsi- (408) 286-5680 x108 Chinese- (408) 286-5680 x109